ismaamulka san diego

# marinka daaradda

## *Aan Kuligeen Qaadano Doorkeena!*

**Inta badan dadka deegaanka ayaa walaac ka qaba nadiifinta marinnadeena biyaha. Xaqiiqdii, xog aruurino laga sameeyay Ismaamulka San Diego ayaa muujinaaya in ka badan 50% dadka deegaanku ay aaminsan yihiin in wasaqda gasha balida, harooyinka, iyo xeebaha ay si toos ah u saamayso ayaga iyo qoysaskooda.**

## *Diyaar ayaan u nahay Inaan ku Caawino.*

Nidaamyada daadka fagaaga sida kanaallada Faranjiga, mutuleelada xaaqinka, iyo kanaallada daadka ayaa loo sameeyay inay biyaha daadka kasoo qaadaan gurigaaga ayna geeyaan wadada ama jidka. Hase yeeshee, **looguma talo gelin inay biyaha kasoo qaadaan meelaha kale** sida daadka beeraha ka yimaada ama biyaha dhaqmada ee kasoo baxa gurigaaga. Biyaha dheeriga ah ee ka yimaada shaqooyinkaan ayaa sidi kara maadooyin sun ah sida sunta cayayaanka, Geedaha Cayayaanka, iyo Bacrimiyaasha beeraha ee galaaya marinnadeena biyaha, biyaha godadka fadhiya ayaana abuuri kara meelo ay kaneeco ka dhalato. Barnamaijka **Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego** ayaa taageeraaya dedaallada dadka deegaanku ugu jiraan kahortaga wasaqda iyo qashinka biyaha asagoo siinaaya **tilmaamahaan muhiimka ah ee kahortaga in biyaha aan ahayn kuwa roobka** galaan nidaamka qaada daadka roobka.

**!**

**Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, majrooradа, iyo biyaha daadka raabka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, wabiyada, io badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka.**

## *Maxaad Samayn Kartaa Si aad U ilaaliso Nadaafada Biyaheena?*

- **Ka leexi madaxyada minjaroorka** daadka maraaya fagaaga.
- **Adeegso qaababka qalalan** sida xaaqista si aad u nadiifiso fagaagaaga iyo banaanka.
- **Ku dhaq agabka** sida alaabta guriga **meel ka leexsan** saxan ama sijaayad marka ad biyo ku shubayso.
- **Si ku meel gaar ah u dabool daadka fagaagaaga** saxan ama sijaayad marka ad biyo ku shubayso.
- **Ku waraabi mareeg gaaban** si aad ugu ogolaato biyaha inay ciidu liqdo.
- **Iska ilaali inaad mariso sunta beeraha** iyo sunta cayayaanka kahor intaan roobku soo di'in.

***Waad ku mahadsan tahay inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.***

*Nasoo Wac si aad u Hesho Xog dheeraad ah.*

**1-888-846-0800**
watersheds@sdcounty.ca.gov
www.sandiegocounty.gov/stormwater

MAARSO 2021